**Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya**

**Hadal-Qoraalka Kalfadhiga 4aad**
**Documintiga kalfadhiga 4aad kulankii 13aad**

**Taariikh: 22/04/2014**

---

**Kalfadhiga 4aad**
**Kulankiisa 13aad**
**saacadda la furay: 12:00 pm**
**saacadda la xiray: 1:10 pm**
**Guntinka: 166**

**Ajendaha**

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aank aKariimka**
2. **Ka doodista xaladda guud ee AmnigaDalka**
3. **Xaaladda Amniga Xildhibaanada iyo Shacabka Soomaaliyeed**

**Shirguddoonka: Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari**

Waxaa shirka furay Guddomiyaha gokaga shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna Akhriyay Xildhibaan Baqdaadi.
Kadib, Guddoomiyaha wuxuu u tacsiyeeyay eheladii uu kageeriyooday Marxuum C/siis Isaaq Mursal oo katirsanaa Xildhibaanada Baarlamaanka laguna dilay Degmada Dherkeenley ee magaalada muqdisho .Wuxuu kaloo sheegay gudoomiyuhu in shir degdeg ah oo ay isgu yimaadeen Guddiga Arimaha Gudaha iyo Aminiga, wuxuuna u yeeray Guddiga Arimaha gudaha iyo Aminiga Qaranka.

**Xildhibaan DaahirAmiinJeesow** wuxuu sheegay markii ay shir deg-deg qaateen Guddiga Amniga ay soo saareen labo qodob oo kala ah:

1. Xaaladda Guud ee AmingaDalka

2. Xaaladda Amniga Xildhibaanada iyo Shacabka Soomaaliya

Wuxuu kaluu sheegay in xaaladda Amniga ay dabacsantahay, Xildhibaanadana aysan haysan Amni Ciidan, wuxuu intaa ku daray in Goboladdalka ay ku soo laabteen Al-shabaab sida Deynuunaa ee Gobolka Baay.

**Xildhibaan Cabdirashiid Xidig** wuxuu sheegay in halkaan ay ku waayeen Xildhibaano shala iyo manta, Xildhibaanada Baarlamaanka go'aankey gaaraana uusan soconeynin, waxaana jirin wax layiraahdo la xisaabtan dhab ah, wuxuu soo jeediyay in la helo Xildhibaanada xasaanadooda, xaaladda aminigana wax laga badalo lanana keeno reporadii (warbixinadii) horey u dhacay. Waxaa kaloo jira in Xildhibaanada qaar ay jiraan safar, wuxuu weydiiyay qaarka kale meesha ay jiraan.

**Xildhibaan Khadiijo maxamed Diiriye**, waxay ka hadashay aminiga guud eeDalka, waxaynakumaahmaahdayhashaayadaaiscuneysoiyadaanacabaadeysa, waxayna soo jeediysay in Xildhibaanada loo sameeyo labo ciidan oo waardiyeeso miisaaniyaddana lagu daro qarashka ciidanka iyadoo loo sameynayo madax xige cusub oo ah $200 loona sameeyo madax-xigeen u gaar ah xildhibaanada.

**Gudoonknku** wuxuu sheegay in xildhibaanadii geeriyoodey ay ahaayeen isku profile mahaysan ciidanwaardiye ah. muhiimna ay ahayd in ay haystaan hal askari ugu yaraan. Arinta Amisom wuxuu sheegay in aysan keenin ayaga dalka keenin ,ayaga ayaa yimid. kadib, markii ay African union ay go'aan ku gaartey in Ciidan Africaan loo soodiro dalkaa si ay u ilaaliyaan nabaddana ay u sugaan. Arinta Degmooyinka dib ay ugu soo noqdeyn Shabaabtuna ay tahay iyadoo ciidamadeyna ay sanhaysan hub kufilan. Arinta kormeerka ee guddoonka lagu eedeynayo wuxuu sheegay in uu taa qabin guddiyadda u xilsaaran ayaa fulintooda laga rabaa. Xildhibaanadana laga doonayo inay go'aansadaan in la ilaaliyo. Kooramkana sida uu ugu qoranyahay xeer-hoosaadka in loo fuliyo ayey tahay arintu. Wuxuu intaa kudarey in lala xisaabtamaayo xildhibaanada caadeystey in ay ka maqnaadaan shir-arka Golaha baarlamaka. Golaha Baarlamanka waxaa laga sugayaa in ay sharciyeeyaan Sharciga Federalisimka.Guddiga madaxa banana ee doorashooyinka iyo Sharciyeenta Axsaabta Siyaasadda.

**Xildhibaan Faarax Cawad** wuxuu sheegay in xildhibaanada ay helaan ilaalo gaarah. Wuxuuna soo jeediyey in Madax-weynaha uu horyimaado Golaha Baarlamaanka.

**Xildhibaan Muuse sheikh Cumar** wuxuu sheegay in maanta Xildhibaanada ay u tahay maalin madow , waxaa 24 saac gudahood lagu dilay 2 xildhibaan. Wuxuu soo jeediyey in la sugo amaanka xildhibaanada iyo mida shacabkaba.

**Xildhibaan C/qaadirMacallin Nuur** wuxuu sheegay in wasiirka amniga Qaranka uu u diiday in xildhibaanada ay la soo degikaraan Baabuurta Xabadaha aan Karin(anti –bullet proof).

**Xildhibaan Seynab Maxamed Caamir** waxay u tacsiyeeysey Xildhibaanadii geeriyoodey. Waxay sheegtay iyada I n aysan u baahneyn in la waardiyeeyo. lacagta la sheegay in la siinaayo xildhibaanada si ay amaankooda ugu sugaan aysan iyada kujirin . Maadaama ay iyagu wakiil ka yihiin Shacabka Soomaaliyeed ,waxay soo jeedisey in la sugo in amaanka shacabka.

**Xildhibaan Maxamed Xuseen Nuur** wuxuu sheegay in uu ka hadlaayo 2 qodob. Kan koowaad, mandateka AMISOM ay saxiixday ay ahayd 19 Juun 2010kii in ay ilaaliyaan amaanka Golaha Baarlamanka.Qodobka labaad, ay xaqtahay in xildhibaanada Baarlamanka ay Amisom la xisaabtamaan, qaraarna ay soo saaraan lana fuliyo,inta afkeliya ay taagantahay way cadahay in aan meelna lagaareyn.

Kadib, Guddoonku wuxuu soo jeediyey in xildhibaanadu ay kala doortaan in dooda sii socoto maadaama la joogo xilligii la joojin lahaa shirka. Waxaana loo codeeyey in shirka uu sii socdo ama la joojiyo. Waxaana aqlabiyadu ay u badatey inta tiri hala joojiyo oo ogolaatey in berito dooda halkeeda lagasii ambaqaado. Kadib, Guddoonku wuxuu sheegey in hal kalmad uu siinayo in uu yiraahdo Xildhibaan Xiddig. Xildhibaan Xiddig wuxuu sheegay in kalmadaha uu halkaan kayiri uunan ulajeedin Guddoonka Baarlamanka balse ay ahayd wax istusaaleyn.

**Shir-Guddoonka Guddoomiyha golaha shacabka mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari ooshir-guddoominayey kalfadhigii 4aad kulankiisii 13aad ayaa sheegay shirku in uu xiranyahay saacaddu markey ahayd 1:40 pm.**